



Diiwaanka Fal dambiyeedka

Criminal Records

Waa maxay diiwaanka fal dambiyeedka?

Diiwaanka fal dambiyeedka ee Minnesota waxaa ka mid noqon kara dhamaan macluumaadka la xiriiira xarigga, dacwad ku oogista iyo ku helidda dacwadaha. Eeg warqadayada xogta aruursan ee [Macluumaadka Dadweynaha u Furan Lala Barbardhiqay Kan Garka Ah](#).

Maxaa xariga qofka la xiro loo gaarsiiyaa dambi baarista?

Sharciga gobolka waxa uu dhigayaa in hay'adaha nabadgelyadu ee gobolku soo sheegaan xarigga dambi dhexe ama mid culus ee caruurta iyo dadka waaweyn. Waxaa sidoo kale waajib ku ah in ay soo sheegaan xariga qaar ka mid ah fal dambiyeedka hoose ee la bar tilmaameedsaday ee dadka waaweyn.



Fiiro gaar ah: Dambiyada hoose ee la bartilmaamdsaday waxaa ka mid ah:

- qofka oo isticmaalay maandooriye oo gaari wada
- dagaalka qoyska dhex mara
- qofka waxyaabaha u gaarka ah la fara geliyo
- qofka oo is qaawiya
- dagaalka qoyska dhex mara
- jabinta amarka maxkamadda ee dagaalka qoyska dhex mara, amarka kala dheereynta, amarka kala badabaadinta, iyo amarka kala fogeynta.

Xarigaas waa in la gaarsiiyaa Xafiiska Dambi Baarista (BCA). BCA waxa ay heystaa diiwaanka fal dambiyeedka ka dhaca gobolka oo dhan.

Waa maxay midka aan la gaarsiin dambi baarista?

Ma aha in dhamaan dambiyada hoose loo gudbiyo BCA laakiin ciidanka booliska ee degaanku way u gubbin karaan haddii ay sidaas doortaan.

Dambiyada hoose ee aan inta badan loo gudbin waxaa ka mid ah:

- buuqa dadka dhex mara
- tuuganamida lacag yar ah iyo
- tigidhada gaadiidka ee aan la xiriirin cabista khamriga

Xagee lagu hayaa diiwaanka fal dambiyeedka?

Diiwaanka fal dambiyeedka waxaa lagu hayaa maxkamadda, BCA iyo hay'adaha kale ee nabadgelyada sida saldhigyada booliska ee degaanka. Marka qaar waxaa macluumaadka ururiya oo haya shirkado gaar ah.

Sidee lagu ogaadaa:

- Bogga internetka ee maxkamadda ayaa kaga baari kartaa magaca qofka dacwadaha qofka lagu helay dambiga. Keydka macluumaadka ee sida lagu baaran karo waxaa lagu magacaabaa Gelitaanka Macluumaadka ee MNCIS "Remote Access MNCIS" ama Nidaamka Kombiyuutarada ee Minnesota Si aad u hesho, soo booqo: <http://pa.courts.state.mn.us>. (ingiriisi kaliya)

Keydka Macluumaadka ee MNCIS waxa aad ka daabacan kartaa "Diiwaanka dhaqdhaqaaqa" kaasoo oo fikrad wanaagsan kaa siinaya wax walba oo ku saabsan dacwadaada mudadii ay socotay.

Marka aad raadiso magaca qofka, nidaamka keydka ee MNCIS **kama** arkeysid dacwadaha aan weli go'aan laga gaarin iyo kuwa labaabi'iyey. Tani waxa ay ku dhacday maadaama aan dacwadda weli qofka laguma helin. Sidoo kale lagama ogaan karo diiwaanka xarigga ee aanay jirin dacwad maxkamadda laga furay.

Fiiro Gar Ah: Dacwadaha aan qofka lagu helin weli waad ka ogaan kartaa nidmaamka kombiyuutarada ee MNCIS, laakiin laguma baaran karo magaca qofka, waa in aad garaneyso labarka gal dacwadeedka.

- Baaritaan dhameystiran oo ay ka mid yihiin dacwadaha la baabi'iyey iyo kuwa weli furan, waxa aad ka ogaan kartaa kombiyuutarada maxkamadaha Minnesota ee dadweynaha u furan ee nidaamka kombiyuutarada MNCIS. Tag maxkamadda oo weydiiso xogheynta liiska dacwadaha fal dambiyeedka. Maxkamadaha intooda badan waxa ay ka qaadaan lacag yar \$8.00 ilaa \$10.00. **Uma baahnid in aad dabacdo diiwaan kasta si gaar ah,** weydiiso xogheynta NATIJJADA BOGGA BAARITAANKA DACWADAHA. Liiska waxaa ku qoran dhamaan dacwadaha iyo lambarka dacwadaha. Waxa kale oo aad sawir ka qaadi kartaa bogga natiijada dacwadaha umana baahnid in aad lacag ku bixiso.
- Bogga internetka ee BCA <https://dps.mn.gov/divisions/bca/> waxa aad ka heli kartaa diiwaanka dacwadaha ee lagugu helay iyo kuwa aad xukunkooda dhameysatay 15kii sano ee la soo dhaafay. Si aad u hesho diiwaankaaga BCA, oo ay ka mid yihiin macluumaadka xarigga aan lagugu helin dambiga, waa in aad boostada ku codsataa ama tagtaa xafiiska. (akhri xagga hoose)
- Macluumaadka shirkadaha gaarka ah waxaa laga yaabaa in aad ka heli karto barta internetka ee shirkadda. Waa in aad iyaga la xiriirtaa.



Haddii aad dooneyso in aad ogaato dacwad gobol kale, la xiriir meesha uu dambigu ka dhacay.

Sidee ayaa diiwaanka fal dambiyeedka ugu dhan yahay macluumaadka ay iga hayaan BCA?

Diiwaanka faldambiyeedka ee BCA waxaa uu ka kooban yahay macluumaadka ciidanka nabadgelyada, maxkamadaha, iyo xabsiyada ee gobolka oo dhan.

Laakiin, haddii aan faro lagaa qaadin, macluumaadka la xiriira dambiga aad gashay qeyb kama noqonayo diiwaanka fal dambiyeedka ay kaa hayaan BCA xitaa haddii dambiga lagu helay.

Sidee ayaan kaga codsan karaa BCA diiwaankayga fal dambiyeedka oo dhameystiran?

Waxa aad ka codsan kartaa BCA diiwaankay fal dambiyeedka oo dhameystiran. Midka dadweynaha oo dhan arki karaan iyo midka kuu gaarka ah Waxa laguugu soo diri karaa boostada ama waad ka soo qaadan kartaa xafiiska.

Boostada: Buuxi foomka codsiga ([request form](#)). Foomka ka soo qaado BCA ama buuxi midkan ku lifaaqan xogta urursan. Foomka buuxi oo nootayada soo mari.



Waajib kuguma aha in aad isticmaasho foomka. Waxa aad qori kartaa warqad aad ku codsaneyso nuqul ka mid ah diiwaankaaga. Weli waa in aad soo marisaa nootaayada. Hubi in aad warqadda ku qorto magacaaga iyo taariikhda dhalashada, iyo magacyo kale oo aad horey ula baxday.

Buuxi foomka oo soo raaci jeegaaga bangiga ama jeeg (money order) dhan \$8 kuna qoran BCA. Waxa kale oo aad raacisaa baqshad tigidh leh oo ku qoran cinwaanka natiijdada laguugu soo dirayo.

Xafiiska aad tagto: Waxa aad tagi kartaa xafiiska BCA waxa aad weydiisan kartaa nuqul ka mid ah diiwaankaaga. **BCA waxa ay sawir ka qaadayaan farahaaga.** Waxaa lagaa doonayaa lacag \$8.00 ah. Waxaa lagaa doonayaa in aad la timaado aqoonsi, sida leesinka gawaaarida.

BCA xafiiskooda waa 1430 Maryland Ave. E., St. Paul, MN 55106.
Telefoonka BCA waa (651) 793-7000.

Maxaan yeelayaa haddii waxyaabaha ku jira diiwaanka BCA aanay sax aheyn ama wax ka maqan yihiin?

Haddii aadan ku raacsaneyn macluumaadka diiwaanka BCA, waxa aad xaq u leedahay in aad macluumaadka taxaddi ku sameyso. Waxaa lagaa doonayaa in aad sharaxaad ka bixiso sababta aad ugu maleyneyso in macluumaadkaaga uusan dhameystirneyn ama u khaldan yahay.

Waa in aad qoraal ka dhigtaa. Faahfaahintaada qoraalka ah u soo dir BCA:

Minnesota Bureau of Criminal Apprehension
1430 Maryland Ave. East
St. Paul, Minnesota 55106


BCA waxa ay heystaa muddo 30 cisho ah oo ay ku eegto waxyaabaha aad tilmaantay oo ay ku soo wargeliso waxa ay go'aan ku gaaraan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka BCA, soo booqo bogooda internetka ee:

<https://dps.mn.gov/divisions/bca/> (ingiriisi kaliya)

- Guji Adeegga Dadweynaha (Public Services) ee dhinaca bidixda
- Guji Taariikhda Fal Dambiyeedka "Criminal History"

Guji Macluumaadka Guud (General Information) ka dib faqrada yar ee ka dambeysa waxyaabaha ay qabato BCA.

La tasho qareen haddii aad dooneyso in aad ka doodo diiwaanka.



- The Legal Rights Center (Degmada Hennepin) (Adeegga Sharciyada - Degmada Hennepin)
Soo booqo: www.legalrightscenter.org ama soo wac 612-337-0030.
- The Neighborhood Justice Center (Ramsey County) (Degmada Ramsey)
Soo booqo: www.njcinc.org ama soowac 651-222-4703.
- The Indian Legal Assistance Program Barnaamijka Gargaarka Indiyaanka (Degmooyinka St. Louis, Carlton, Lake, Cook, Aitkin, Mille Lacs, Pine, Crow Wing iyo Morrison)
Soo booqo: <http://ilap-duluth.com> ama soo wac 218-727-2881.
- The Regional Native Public Defense Corporation (Haddii aad ka tirsan tahay Qabiilada daga White Earth ama Leech Lake Reservations ama aad degan tahay degmooyinka Beltrami, Cass, Clearwater, Hubbard, Itasca, iyo Mahnommen)
Soo booqo: <http://rnpdc.org> ama soo wac 218-339-5680.

Wax aan ka qaban karo ma jiraan fal dambiyeedka aan galay ee laga arki karo barta internetka?

Waxaa jira shirkado uu dakhli ka soo galo faafinta diiwaanka fal dambiyeedka ee barta internetka. Kuwaas waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa "dulaaleyda." Dulaal kasta si ka duwan kan kale ayey xogtaada ugu saaraan kombiyuutarka. Haddii aad aragto macluumaad khalad ah oo kuugu jira kombiyuutarka, si toos ah ula xiriir dulaalka.



Waxyaabaha ma ka saari kartaa taariikhda fal dambiyeedka?

Mararka qaarkood. Waxaa lagu magaabaa Qarinta. Qarinta waa marka aad maxkamadda ka codsato in qaaligu amro in diiwaankaaga laga qariyo dadweynaha. In aad hesho amarka qarinta waxa ay ku caawineysaa haddii ay kugu adkaato in aad hesho shaqo, guriyeynta, ama leesinka shaqada fal dambiyeedka diiwaanka kuu galay darteed.

Diiwaanka la qariyey LAMA baabi'in. Booliska, FBI, laanta socdaalka, iyo saraakiisha kale ee dawladdu weli way arki karaan qoraalada ay maxkamaddu qarisyay sababo gaar ah dartood.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo qarintan ah. Bogga internetka ee maxkamadda ayaad ka heli kartaa macluumaad dhameystiran oo ku saabsan qarinta: www.mncourts.gov/Help-Topics/Criminal-Expungement.aspx. (ingiriisi kaliya)

Qarinta waa hab aad u adag. La tasho qareen haddii aad dooneyso in aad codsato qarinta diiwaanka.

Caawinaad ku saabsan qarinta diiwaanka

- Qaar ka mid ah degmooyinka ama Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa waxaa ka jira barnaamijyo dadka ka caawiya qarinta. Soo booqo <https://www.ag.state.mn.us/Office/Expungement.asp>
- The Volunteer Lawyers Network (VLN) (Qareenada Mutadawiciinta Ah). VLN waxa ay idiin fidin karaan caawinaad lacag la'aan ah meelo kala duwan oo gobolka ah. Soo booqo: www.vlnmn.org ama soo wac 612- 752- 6677..
- The Legal Rights Center (Degmada Hennepin) (Adeegga Sharciyada - Degmada Hennepin) Soo booqo: www.legalrightscenter.org ama soo wac 612-337-0030.
- The Neighborhood Justice Center (Ramsey County) (Degmada Ramsey) Soo booqo: www.njcinc.org ama soowac 651-222-4703.

Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Xafiiska Gargaarka Sharciga (Local Legal Aid office) ee 1-(877) 696-6529 oo arag haddii ay kaa caawin karaan qarinta dacwadaha.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

Notarize and mail this request with \$8.00 and a Self-Addressed Stamped envelope to this address:
Codsigaaga oo soo mari nootaayada oo soo raaci \$8.00 iyo baqshad leh tikidka boostada iyo cinwaankii lagu soo diri lahaa:

**CJIS Criminal History Access Unit
Bureau of Criminal Apprehension
1430 Maryland Avenue East
St. Paul, MN 55106**

REQUEST FOR COPY OF CRIMINAL RECORD FROM THE BUREAU OF CRIMINAL APPREHENSION

Codsiga Nuqul Ka Mid Ah Diiwaankaaga Fal Dambiyeedka Ee Xafiiska Dabi Baarayaasha Gobolka

****Note: if you are seeking expungement of a predatory offense (for example, criminal sexual conduct), please contact an attorney first****

****FIIRO GAAR AH: haddii aad dooneyso in aad codsato in diiwaankaaga la xiriir xadgudubka la qariyo (tusaale ahaan sida xadgudubka galmoodka), fadlan la xiriir qareen marka hore****

Please mail me copies of both my public and private BCA Criminal Records, both juvenile and adult, to the address listed below:

Fadlan ii soo dir nuqul ka mid ah Diiwaankayga Fal Dambiyeedka BCA ee dadweynaha u furan iyo kan qaarka ah, ee caruurnimada iyo dadka waaweyn:

Name (*Magac*)

Address (*Cinwaanka*)

City, State and Zip (*Magaalada, Gobolka iyo Nawaaxiga (IYO Zip)*)

I understand that the BCA needs the following information to release my records:

Waxa aan fahamsanahay BCA iga dooneyso macluumaadka hoos ku xusan si ay u baarto macluumaadkeyga:

Full Name (*Magaca Sadexan*): _____

Other Names - Maiden Name, Former Married Name, Alias, etc:

Magacyada kale - Magaca Guurka, Magacyada Hore ee La li Yaqiinay, Naaneys, iwm:

Date of Birth (*Taariikhda Dhalashada*): _____

Signature (*You must sign in the presence of a Notary Public*):

Saxiix (Waa in aad ku saxiixdaa Nootaayada Dadweynaha):

Today's Date (*Taariikhda Maanta*): _____

I understand that even if I am on public assistance or reside in a shelter the BCA will still not waive the \$8.00 cost associated with sending me my criminal record. Enclosed as the payment of the \$8.00 fee is: (circle one of the following)

Waxa aan fahamsanahay xitaa haddii aan la i siin gargaarka dadweynaha ama aanan deganeyn guryaha dadweynaha in BCA aanay iga cafineyn \$8.00 ee la doonayo in aan bixiyo si la iigu soo diro diiwaanka fal dambiyeedka. Waxaan ku soo lifaaqay lacagta kharashka oo dhan \$8.00 kuna soo diray: (Mid ka dooro)

a personal check / a money order / cash (not recommended)

Jeegeyga bangiga / jeegga (money order) / cadaan (ha ku soo dirin)

Notorization (Nootaayada):

Sworn/affirmed before me this ____ day of
Waxaa igu hor dhaartay/i hor yimid ____ maalinta

Notary Public / Deputy Court Administrator
Nootaayada Dadweynaha / Shaqaalaha Maxkamadda

_____, 20____